



Somalia Non-State Actors (SONSA)

Somalia Non-State Actors www.sonsaplatform.org info@sonsaplatform.org Tel: +252612870023

Wada-tashiga Bulshada Rayidka ee Hannaanka kala-guurka Siyaasada Dalka iyo Geedi socodka Doorashooyinka 2020/21.

War- murtiyeed

26 February 2020: Kulan laba maalmood soconaayay oo ay isugu yimaadeen qaybaha kala duwan ee Ururada Bulshada Rayidka, Odayaasha dhaqanka, culumaa-udiinka, dhalinyarada, Haweenka, dadka baahyaha gaarka qaba ee Dowlad Gobaleedka Koonfur-Galbeed oo looga dooddayay Hannaanka kala-guurka Siyaasada Dalka iyo Geedi socodka Doorashooyinka 2020/21 ayaa ka qabsoomay Magaalada Baydhabo .

Kulanka ayaa diirada lagu saaray ka doodista waxyaabaha ku xeeran hannaanka kalaguurka siyaasada iyo doorashooyinka la filayo in dalka ka dhacdo 2020/21 oo ay ugu muhiimsanyihiin;- habka ugu haboon ee loo qaban karo doorasho ay kawada qayb galaan dhammaan Bulshada Soomaaliyeed si siman, dalkana aan kusoo kordhin caqabado iyo xasilooni daro.

Dood dheer iyo wadatshi loo dhanyahay kadib, kasoo qayb galayaasha kulanka ayaa soo bandhigay talo soo jeedin muhiim u ah in la qabto doorasho loo dhanyahay oo xor iyo xalaal ah , waxayna yihiin talo soojeedimahaas:-

1. In doorashada 2020/21 ay ku qabsoonto waqtigii loo asteeyay oo marnaba aysan dhicin in dib loo dhigo
2. In doorasho xor iyo xalaal ah oo si siman uga wada qayb galaan dhammaan qaybaha kala-duwan ee Bulshada ay Dalka ka dhacdo.
3. In bulshada rayidka ay korjoogto kanoqdaan geedi socodka doorashooyinka ee la filayo in ay dalka ka qabsoomto 2020-21, sidoo kale qayb wayn ka qaataan xallinta khilaafaadka kadhalan kara xiliga doorashooyinka.
4. In xubnaha aqalka sare tiro siman lagu qaybsado oo dhammaan mamul gobaleedyada si siman u qaybsadaan.
5. In hogaanka Dalka iyo siyaasiyiinta ay ururada bulshada rayidka u ogolaadaan gudashada waajibaadka uga aadan badbaadada, horumarka iyo kor uqaadida nidaamka dowlad wanaag ee dalka.
6. In hogaanka Dowladda Federaalka iyo Maamul Gobaleedyada ay ka go'naansho la imaadaan kusaabsan xiriir iyo wada shaqayn dhab ah oo ay layeeshaan bulshada rayidka.
7. In haweenka, dhallinyarada iyo dadka baahyaha gaarka qaba door wayn laga siiyo ka qayb galkooda hannaanka siyaasdeed ee Dalka.

8. In Ururada Bulshada Rayidka ay la yimadan ka go'naansho iyo midnimo ku aadan ka qayb galkooda arrimaha masiiriga ee Dalka , iyaga oo sidoo kale kaalin wayn ka qaadanaya wacyigalinta bulshada ee arimaha doorashooyinka iyo dowlada wanaaga.